

LAND TIROL

# Ila adal Aniga iyo I dhageyao Aniga!

12 Dhibcood ee Taageerida
Carruurteena ee Waxbarashada
Sida loo Hadlo

**Buug-yaraha Waaladiinta**

**0–5 Sanno**

Somali Ausgabe

**Calaameynta**

Milkiilaha, daabacaha iyo qeybiyaha: Xafiiska Dowlada Faderaalka Gobolka Tyrolean, Waxbarashada aasaasiga ah iyo waxbarashada guud iyo Waaxda waxbarashada Tyrolean.

Tusmada iyo fikradaha: Elisabeth Allgäuer-Hackl, Gerlinde Sammer, Elizabet Hintner

Qoraalka: Elisabeth Allgäuer-Hackl, Lidwina Boso

Tafaftirayaasha: Eva Grabherr (okay. zusammen leben), Johann Gstir (Xafiiska Dowlada Faderaalka Gobolka Tyrolean, Waaxda Bulshada iyo Shaqada – Waaxda Kala Duwanaanshaha), Nicola Köfler (Caasimada Innsbruck)

Naqshad sawireed: Birgit Raitmayr | pixlerei.at

Sawirada: Land Tirol/Die Fotografen, pexels.com, shutterstock.com

Daabac: Alpina Druck GmbH, Innsbruck

Daabacaada 1aad 2010 | daabacaada 2aad 2018 | daabacaada 3aad 2018 | daabacaada 4aad 2022
© okay. zusammen leben / Xarunta Mashruuca Socdaalka iyo Isdhaxgalka (Verein Aktion Mitarbeit), Dornbirn (Austria), Nofeembar 2008
Tusmooyinka ugu weyn ee buug-yarahaan waxaa la hormariyay gudaha 2008 oo Gobolka Faderaalka ee Vorarlberg sida qeyb ka ah barnaamijka “Luuqad Badan: dhiirogelinta hore ee xirfadaha luuqada iyo labada luuqadood – caqabada qoysaska iyo xarumaha sannoyinka hore”. Warbixinta ku saabsan barnaamijka waxaa laga heli karaa: www.okay-line.at

**Warbixinta:**

Amt der Tiroler Landesregierung, Abteilung Elementarbildung und allgemeines Bildungswesen (Xafiiska dawladda gobolka Tyrolean, waaxda waxbarashada dugsiga hoose iyo waxbarashada guud)
Heiliggeiststraße 7–9, 6020 Innsbruck
Taleefonka: +43 (0) 512/508-7742
I-meelka: elementar.bildung@tirol.gv.at
Intarneetka: https://www.tirol.gv.at/bildung/elementarbildung

Bildungsdirektion für Tirol (Agaasinka waxbarashada ee Tyrol)
Heiliggeiststraße 7–9, 6020 Innsbruck
Taleefonka: +43 (0) 512/508-2552
I-meelka: office@bildung-tirol.gv.at
Intarneetka: https://bildung-tirol.gv.at

# Gacaliyayaal Waalidiinta,





Wacanaa marka dhallaanku ku dhawaaqaan ereyadooda ugu horreeya, ee ay karaan “sheekaysi” oo ay yeehsaan xiriirtan ay adeegsanayaan luuqad. Sannooyinkaas ugu horreeyaa waa waqti muhiim ku ah qaabaysiga iyo kobaca qofka luuqadiisa. Sida la fahamsan yahay, waalidiintu waxay rabaan inay arrintan ka caawiyaan carruurtooda. Buugyarahan *"Sprich mit mir und hör mir zu!"* ("Ila hadal oo i-dhagayso") waa taageero siinaysa talooyin waxku-ool ah si ay ugu hagaan carruurta hal, laba ama luuqado badan. Sideedaba, ku-fiicnaanta luqadeed waa arrin muhiim ku ah nolosha mujtamaceena oo waa sal muhiim ku ah mihnad kasta oo shaqo mustaqbalka.

Hagista carruurta marka ay baranayaan sida loo hadlo waxay u tahay tayeeyin iyo madadaalo adiga iyo carruurtaada labadiinaba. Xaashidan waxay bixinaysaa fikrado ku habboon da’da si aad si taxadir leh oo hufan ugu kobciso koritaanka luuqadda ilmahaaga.

Waxaan kuu rajeynaynaa inaad waqti fiican la qaadato ilmahaaga iyo wanaag badan.

Cornelia Hagele,
Xabin ka mid ah dawladda gobolka
Eva Pawlata,
Xabin ka mid ah dawladda gobolka

Ma ogtahay midaas …

**… waxaad xittaa taageeri kartaa hadalka canugaaga iyo hormarka luuqada inta lagu jiro uurka?**

**1.** *Nabadeey,*
*ma i arki kartid,*
*laakin waan ku maqli karaa!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Canuga wuu garanayaa marhore codadka, gaar ahaan midka hooyadiisa/hooyadeeda, kadib bisha afaraad ee uurka.
- Canuga wuxuu bartaa inuu aqoonsado laxanka luuqadiisa/luuqadeeda hooyo xittaa ka hor inta uusan dhalan. Ilmaha caloosha ku jiro waxay sidoo kale saameyn ku yeeshaan muusiga, dhawaqa iyo qeylada.
- Waaladiinta waa madaxa ku dayashada waaladiintooda oo luuqada inta lagu jiro sanooyinkiisa/sanooyinkeeda ugu horeeyo ee nolosha. Sidaas darteeda waa muhiim inta lagu jiro uurka in waaladiinta ka fakaraan luuqadee ama luuqadahee ay rabaan inay kula hadlaan canugooda.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba

**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**



- Waxaad bilaabi kartaa inaad u sheegtid canugaaga wax ku saabsan caalamka aad ku nooshahay ee sida bil-laha koowaad ee uurka. U sheeg canugaaga wax ku saabsan waxyaabaha adiga ku quseeyo.
- Aqri kuwa xiggo si ay kaaga caawiso go'aansiga luuqadee ama luuqadahee ayaa guriga loogala hadlaa canugaaga:
- Kula hadal canugaaga luuqada aad dareentid inay inta badan kugu haboontahay iyo inaad si wanaagsan ugu hadashid. Markii aad midaan sameysid, waxaad siineysaa canugaaga erayada ugu weyn ee suurtogalka ah. Iyo waxaad sidoo kale hoos dhigeysaa aasaaska ee dhammaan luuqadaha kale ee canugaaga ku barto noloshiisa/nolosheeda.
- Waxay sidoo kale u noqon kartaa faa'ido weyn canugaaga haddii adiga iyo ninkaaga/lamaanahaaga ku hadlo luuqado ka duwan. Mid walba oo idinka ah ayaa kadib la qabsan karo canugaaga luuqada aad sida wanaagsan ugu hadashid. Tani waxay la micna tahay in canugaaga ku korayo isaga oo sameynayo naqshadaha hadal wanaagsan oo labo luuqadood ah.
- Intaa waxaa dheer luuqada aad go'aansatid si aad guriga ugu hadashid, aad ayay muhiim u tahay in canugaaga sidoo kale barto af Jarmal – luuqada wadanka halka isaga/iyada ku noolyihiin. Muhiim ayay u tahay canugaaga inuu yeesho hadal wanaagsan ee af Jarmalka haddii isaga/iyada ay u dareemayaan halkaan guriga, samey saaxibo cusub oo hel waxbarasho wanaagsan. Canugaaga wuxuu weli baran karaa inuu si wanaagsan ugu hadlo af Jarmal, xittaa haddii aad kula hadashid luuqad ka duwan isaga/iyada guriga.

Ma ogtahay midaas …

**… canugaaga wuxuu bartaa inta badan markii aad kula hadashid isaga/iyada luuqada aad garaneysid inta badan?**

# 2. *Luuqada hooyada wa caadi!*
# *– Luuqada aabaha waa caadi!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Xiriirada dareenka wanaagsan waxay siisaa aasaas muhiim ah ee hormarka canuga guud sidoo kale sida hadalkiisa/hadalkeeda iyo hormarka luuqada. Carruurta waxay markiiba ogaadaan haddii waaladiintooda iyaga la hadlayaan waxay ku dareemaan raaxo iyo kalsooni ee ku hadlida.
- Waaladiinta wanaagsan waxay ku hadli karaan luuqada ay rabaan inay u gudbiyaan canugooda, sida wanaagsan ee ay tahay hadalka canuga iyo hormarka luuqada.
- Lahaanshaha hadal wanaagsan ee luuqadaada hooyo waa sharuuda ugu wanaagsan ee barashada luuqado kale. Luuqa walba waxay wadataa cilmiga ku saabsan caalamka ee sidoo kale aad u gudbiso canugaaga.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba



**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**

- Kula hadal luuqada ama lahjada aad si wanaagsan u garaneysid canugaaga.
- La hadal canugaaga sida badan ee suurtogalka ah oo sii isaga/iyada fursad badan iyo waqti uu nafsadiisa/nafsadeea ku hadlaan.
- U sheeg canugaaga waxyaabaha ku saabsan cida aad tahay iyo halka aad ka timid adiga oo u sheegayo sheekooyin, u heesayo heeso iyo ciyaarayo ciyaaraha carruurta ee wadankaaga asalka. Taasi waa muhiim sababtoo ah carruurta waxay u baahanyihiin xidido ay ku koraan oo ku hormaraan.
- Hel qaabab cusub oo wanaagsan ee canugaaga ku barto luuqadaha kale. U daji tusaale wanaagsan canugaaga. Haddii aad haysid siyaabo wanaagsan ee dhinacyada luuqadaha iyo barashada luuqada, oo dhinacyada joogteynta luuqadaada gaarka ah iyo af Jarmalka, siyaabahaas waxay ku marineysaa canugaaga.

Ma ogtahay midaas …

**… isk-kalsoonida waa sharuuda ugu wanaagsan ee hadalka canugaaga iyo hormarka luuqada?**

# *3. Waan jeclahay qaabka aan ahay!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Canug gaar ahaan wuxuu u baahanyahay jaceylka iyo dareenka waaladiintiisa/waaladiinteeda si markas ay u hormaraan oo u bartaan sida loo hadlo. Canuga waa inuu dareemaa jaceyl oo ogolaadaa haddii isaga/iyada ku korayo isku kalsoonaan. Tamartaan waa muhiimada hormarka canug walba.
- Canuga wuxuu u baahanyahay inuu ammaan dareemo oo rabo. Haddii aadan laheyn waqti lagu dhameysanayo canugaaga xili walba, u sheeg isaga/iyada sababta oo ogeysii isaga/iyada marka aad waqti heleysid. Carruurta waxay u baahanyihiin inay bartaan sababaha sababta waxyaabaha ay u yihiin qaabka ay yihiin ama sababta aysan suurtogal u aheyn.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba



**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**

- Waxaad heleysaa fursado badan illaa maalinta oo aad kula hadashid canugaaga oo aad ka qeybgalisid isaga/iyada wadasheekeysi. Waad sameyn kartaa oo waa inaad bilowdaa inaad midaas sameysid maalinta ugu horeyso ee canugaaga dhasho.
- U sheeg canugaaga waxa aad la sameyneysid isaga/iyada markaas ugu horeeyo. Ka falceli dhawaqyada iyo qeylida isaga/iyada ay sameynayaan oo tusi isaga/iyada inaad jeceshahay dhageysigooda.
- Ha ugu bixin balamaha si aan xad laheyn. Taasi waxay dareensiineysaa canugaaga inuu dareemo ammaan la'aan. Joogtey balamaha aad u sameysid canugaaga.
- La hadal canugaaga oo si taxadar ah u dhageyso waxa uu rabo inuu kuu sheego!
- Canugaaga hakuu sheego waaya aragnimadiisa/waaya aragnimadeeda. Marwalba canugaaga ha dhameeyo sheekooyinkiisa/sheekooyinkeeda oo marnaba ha carqaladeynin.

Ma ogtahay midaas…

**…canugaaga wuxuu si sahlan uga soo qabsan karaa hadalka labo ama luuqado badan marka uu karayo?**

## 4. *Waxaa jiro boos madaxeyga ku jiro oo labo ama luuqado badan!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Dhibaato malahan in carruurta ku koraan iyaga oo ku hadlayo labo ama luuqado badan. Malaayiin carruurta ku nool wadamada halka luuqado badan loogu hadlo xaaladaha nolosha maalin walba. Ku hadlida wax ka badan hal luuqad ma waxyeeleyneyso canugaaga.
- Carruurta luuqada badan waxay u hormaraan sida carruurta halka luuqad, taas oo ah, hawligooda gaarka ah. Qaarkood waxay bilaabaan inay xili hore hadlaan, kuwa kale mar dambe; qaarkood wax badan ayay hadlaan, iyo kuwa kale si yar.
- Qaabka carruurta u bartaan luuqadaha waa dhaqdhaqaaq buuxo. Carruurta waxay marwalba ku jiraan nidaamka barashada waxyaabo cusub iyo isdhaxgalka waxa ay marhore garanayaan. Isku qasida luuqadaha waxay qeyb ka yihiin nidaamyada.
- Waa inaad bilowdaa kaliya inaad ka walaacsanaatid oo aad la tashatid Arzt/Ärztin (G.P.) ama xirfadle kale haddii hadalka canugaaga uusan hormarin waqtiga qaar ama isaga/iyada joojiyo kuwada hadlida dhammaan.
- Carruurta waxay ku koreysaa wax ka badan hal luuqad oo u baahan taageero gaar ah ee luuqadaha oo dhan. Waaladiinta waxay sameyn karaan waxyaabo badan oo kala duwan si ay u hubiyaan in carruurtooda noqdaan bartayaal wanaagsan.

## Sahlan waxyaabaha maalin walba

### Waad u sameyn kartaa canugaaga!

- Maxaad sameyn laheyd haddii aad ku korineysid canugaaga luuqadaada hooyo, tusaale ahaan, Turkiga, Bosniya/Karooshiya/Serbiya, Kurdish, Raashiya, Isbaanish iwm., iyo luuqada looga hadlo banaanka guriga ay tahay af Jarmal?
- Kula hadal canugaaga luuqadaada hooyo sida badan ee suurtogalka ah. Baro qoysaska xaafadaada ee ku hadlaa af Jarmal. Ku caawi canugaaga inay sameeyaan dadka ku hadlo af Jarmalka. U diyaari canugaaga inuu ku biiro Spielgruppe (kooxda ciyaarta) ama Dugsiga barbaarinta (kindergarten). Taasi waxay ku caawineysaa isaga/iyada inay koraan oo hormaraan. Sida dhaqsida ah ee isaga/iyada ula xiriiro carruurta ku hadasho af Jarmalka, sida ugu degdega badan oona ugu sahlan ee ku baranayo isaga/iyada af Jarmalka.
- If waalid walba wuxuu si wanaagsan ugu hadlaa luuqad ka duwan, carruurta waxay leeyihiiin fursada ay ku bartaan labo luuqadood. Hubi inaad leedahay sharciyo cad haddii adiga iyo lamaanahaaga aad ku hadashaan luuqado kale duwan. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay carruurta yar. Mid walba oo idinka ah waa inuu kula hadlaa canugaaga luuqadaada hooyo. Qaabkaas, canugaaga wuxuu bartaa inuu kula xiriiro qofka gaarka ah luuqad gaar ah. Oo midaas waxay ku caawineysaa isaga/iyada inuu xaliyo luuqadaha madxiisa/madexaada ku jiro.
- (Dooqa luuqada waxaa sidoo kale lagu go'aansan karaa xaalada: hal luuqad ayaa la isticmaali karaa xiriirka maalin walba iyada oo mida kale lagu hadlo cashada, sameynta shaqada guriga ama u sheegida sheekooyinka waqtiga jiifka. Qaabkaan waxaa loo yaqaan aasasida "jasiiradaha luuqada.")
- Oo aan laga eegin haddii canugaaga ku hadlo isaga oo ku hadlayo hal, ama labo ama sadex luuqad, waa muhiimada lagu noqonayo dhageyste wanaagsan oo dulqaad leh.

Ma ogtahay midaas…

**…kaliya carruurta si wanaagsan u maqli karo ayaa sidoo kale bartaa inay si wanaagsan u hadlaan?**

**Iyo ma ogtahay haddii aad kula hadashid ilmaha dhawaq sareeyo si dhaqso ah ayay ku jawaabaan?**

# 5. *Ila hadal oo dhageyso aniga!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Maqal wanaagsan waa sharuuda ugu suurtogaleyso inuu si wanaagsan u hadlo. Lix bilood kadib ilmo caafimaadan ayaa sameynayo qeylo badan oo badan, sameynayo dhawaqyada, isaga/iyada isla hadlayo. Haddii taasi aysan aheyn xaalada, waa in la tijaabiyaa maqalka ilmahaaga markale.
- Ilmaha maqalka curyaanka ah sidoo kale waxay sameeyaan dhawaqyo billaha ugu horeeyo nolosha, laakin waxay kadib si sii kordheyso u sii aamusaan.
- La hadlida ilmaha ee dhawaqa sareeyo waxay kordhisaa dareenkooda isbadelka. Taasi waa sida aad ku heli kartid in ilmaha dhoola cadeeyaan xili hore.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba



**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**

- Kormeer canugaaga, gaar ahaan lixda bilood kadib. Miyuu isaga/iyada ka falcelisaa dhawaqyada? Miyuu isaga/iyada wareejiyaa madaxiisa/madaxeeda markii aad u yeertid magaciisa/magaceeda?
- Saacadaha muusiga iyo shanqarta si gaar ah ayay ugu haboontahay soo jiidashada dareenka ilmahaaga.
- La hadal canugaaga inta badan ee suurtogalka ah. Waxaad ka hadli kartaa wax walba oo aad sameysid, midkood iqtiyaarkaaga ama la jiro canugaaga!
- Sifee dhawaqyada iyo shanqarta ilmahaaga. Waa inaad la hadashaa ilmahaaga yar waqtiga isaga/iyada uu dhashay oo u sheegayo isaga/iyada waxa aad la sameyneysid isaga/iyada markaas ugu horeeyo. Carruurta da'aha oo dhan waxay jecelyihiin heesaha iyo laxanada xanaanada.
- Ha iloobi inaad u qaadid ilmahaaha ama socod baradkaaga baaritaan, gaar ahaan kadib caabuqa dhagaha: waxaad aadi kartaa Elternberatung (la talinta waalidka ee degmadaada) ama Arzt/Ärztin (Dhaqtarka Guud).

Ma ogtahay midaas…

**…dhammaan jumlooyinka waxaa loo isticmaalaa varashada lagu hadlayo? Taabanayo, lagu arkayo, lagula kulmayo, lagu soo qabsanayo waxyaabaha iwm.**
**waa sida muhiimka ah ee maqalka.**

# 6. *Waan sameyn karaa nafsadeyda!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Maqalka, aragtida, taabashada, dhaqaaqida, soo qabsashada, la kulmayo dhaqaaqa, darenka culeyska iyo waxyaabo kale oo badan ee ku caawinayo ilmahaaga inay la kulmaan oo fahmaan caalamka. Tani waa sida ilmaha u hormariyaan dareenkooda, xirfadahooda caqliga iyo bulshada iyo xittaa hadalka luuqadooda.

- Ilmahaaga wuxuu fahmayaa waxa erayada “simman” iyo “adag” waxay la micna tahay markii isaga/iyada loo ogolyahay inay soo qabsadaan waxyaabaha. Loo ogolaaday inay cuntooyinka tijaabiyaan waxay ku caawineysaa isaga/iyada inay fahmaan erayada “macaanka” iyo “dhannaanka.” Isaga/iyada wuxuu ogaanayaa dhinacyada iyo geesaha ee marka loo ogolyahay isaga/iyada inuu gurguurto. Ilmaha waxay hormariyaan fahamka afkaaraha jiray ee ka dambeyso erayada sahminayo erayga agagaarkood ah.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba

**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**



- Ku qabo ilmahaaga garbahaaga sida badan ee suurtogalka ah oo canugaaga haka dareemo wanaag ku saabsan inaad adiga taabatid.
- Canugaaga hala ciyaaro sheeyada kala duwan, taabashada, qabo oo u ogolow inay socdaan. Sii isaga/iyada wax ay calaaliyaan. Ilmahaaga haka waayo arag qaato waxyaabaha badan ee suurtogalka ah nafsadiisa/nafsadeeda.
- Markii canugaaga uu weynaado, ha isku dayo isaga/iyada howlo badan ee suurtogalka ah: guriga, guurguurashada/orodka ee garoonka ama beerta, isaga oo ku ciyaarayo ciida iyo biyaha, qeylida iyo heesida, kugu caawinayo karinta, diyaarinta miiska, qodida ciida iyo ku abuurida waxyaabaha beerta.

Ma ogtahay midaas…

**…waxaa jiro xiriir u dhaxeeyo dhaqdhaqaaqa, ciyaarta, nafaqada caafimaadan, si madax banaan u qaado oo leeyahay ilko caafimaadan iyo hadalka canugaaga iyo hormarka luuqada?**

# *7. Waxaan sameyn karaa waxyaabo ka badan qiyaastaada!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Carruurta waxay u baahanyihiin inay qaataan waaya aragnimo badan oo ciyaarida iyo dhaqaaqa. La siinayo carruurta fursado badan ee lagu dhaqaaqayo oo lagu ciyaarayo waxay ku caawisaa iyaga inay bartaan sida loogu hadlo si wanaagsan. Waa inaad u ogolaataa canugaaga inuu boodo, dhakawleenta, socodka, orodka, dheesha iwm. Luuqada iyo dhaqaaqa way isla socdaan.
- Dhaqaaqyada afka iyo carabka waxay noqdaan kuwa sax ah markii dhaqaaqa carruurta, gaar ahaan xirfadahooda dhaqaaqa yar, wuxuu ku noqdaa wanaag badan oo dhinaca ciyaarta.
- Ilkaha saxda isugu xiran muhiim ayay u tahay canuga si ay ugu suurtogasho inuu barto sida si sax ah loogu hadlo. Wanaagsan, ku dhawaaqida caqliga ah waxay ka qeyb tahay ugu hadlida luuqada si wanaagsan.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba

**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**



- Canugaaga ha dheelitiro darbiga hooseeyo, ku cuno farahiisa/faraheeda, ku cabo istarowga, afuufo balooniyada suufka iwm. Geey canugaaga garoonka iyo dhinaca baadiyaha sida badan ee aad awoodid. La dhis ama la samey waxyaabaha canugaaga oo haku ciyaaro isaga/iyada manqasyada. Carruurta isma waxyeeleyn karaan haddii qof weyn la joogo. Waxay bartaan dhaqaaqyada saxda ah oo u suurtigaleyso inay hormariyaan qiyaastooda.
- Waa inaad siisaa kaliya canugaaga masaasada ama ibta caaga si ay ugu isticmalaan sida dhifka ee suurtogalka ah, oo waa inaad hubtaa inaad ka jabiso isaga caadada dhalashadiisa 2aad. Isticmaalka muddada dheer ee masaasada waxay sababi kartaa dhibaatooyinka ilkaha iyo hadalka.
- Cuntada caafimaadan iyo mararka qaar in la calaaliyo sidoo kale waa muhiim.
- Canugaaga waa inuusan cabin cabitaanada macaan, sababtoo ah sonkorta badan way waxyeeshaa ilkaha iyo caafimaadka jir ahaanta. Biyaha iyo shaaha la qaboojiyay waxay u wanaagsantahay daaweynta oonka sidoo kale!

Ma ogtahay midaas…

**…la hadlida iyo la ciyaarida canugaaga oo maalin walba ah waxay ku caawin kartaa in isaga/iyada sameeyaan hormar weyn ee barashada sida loo hadlo?**

# 8. *Miyaad ila ciyaareysaa?*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Ku raaxeyso la sameynta waxyaabaha canugaaga, la hadlidiisa iyo la ciyaarkiisa. Hal natiijo ee dhacdada howlahaan ay sababto waa mida maskaxda canugaaga waxay u hormareysaa naqshado iyo shabakado taas oo ku adkaaneyso hormarka hadalkiisa iyo kartida waxbarashadiisa hadhowdii dambe marka uu dugsiga joogo.
- Dhageysiga iyo u isticmaalida sida firfircoon luuqad ama luuqado ee joogtada ku saleysan waxay ku caawisaa canugaaga inuu ogaado sharciyada luuqadaas/luuqadahaas. Canugaaga wuxuu baran karaa erayo, sahmiyaa naxwaha luuqadahaas oo si sax ah ula xiriiraa dadka kale. Canugaaga wuxuu u baahanyahay tallooyin badan oo waa inuusan dhageysan kaliya wax badan laakin wax badan hadlaa.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba

**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**

- Kula hadal oo kula ciyaar canugaaga heerkiisa/heerkeeda. Si toos ah ula hadal canugaaga – ugu yaraan shan iyo toban daqiiqo maalintii.
- Sidoo kale la hadal canugaaga markii isaga/iyada sameynayo howlaha maalin walba, yusaale ahaan, iska siibida kabahiisa/kabaheeda ama jaakada, dacas xerashada, cabida koob shaah ah, sariir seexinta iwm. Tilmaamaha iyo amarada kuma filna.



- Isticmaal qaabdhismeedyada iyo erayada luuqad kala duwan. Qaabkaas, canugaaga wuxuu kordhinayaa erayadiisa /erayadeeda (Tusaale ahaan, isticmaal erayo kala duwan ee lagu muujinayo isla tusmada: quruxda, soo jiidashada, fiicnaanta iwm.).
- Laxanada iyo heesaha xanaadada waa illo wanaagsan ee carruurta oo da' walba ah si ay u hormariyaan hadalka iyo luuqada. Haddii aadan markale xasuusan karin heesaha iyo laxanada xanaanada ee lagu baray ciyaalnimadaada, weydii waaladiintaada ama xubnaha qoyska weyn, ama ka raadi buuggaagta. Haddii kale, waxaad sameyn kartaa laxanada iyo sheekooyinka xanaanadaada gaarka ah.

Ma ogtahay midaas…

**…waa inaadan marwalba saxin canugaaga oo ha uga baahan inuu ku celiyo/ku celiso erayga ama jumlada saxda ah?**

# 9. *Waxaan rabaa inaan kuu sheego wax!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Waa muhiim inaad si dhow uga taxadartaa canugaaga marka uu rabaa inuu wax kuu sheego.
- Saxitaanada waxay qaadataa dhammaan iska hadalka madadaalada. Inta badan ee farsamada wax ku oolka ay tahay saxida ku celinta.
- Carruurta ma muujiyaan marwalba waxa ay sameyn karaan. Inta badan waxay fahmaan wax aad u badan oo hadlaan wax aad u yar. Carruurta waxay u baahanyihiin waqtiga ay ku koraan.
- Markii carruurta ay koraan iyaga oo ku hadlayo labo luuqad, hal luuqad ayaa aad u hormari karto iyo mida kale si yar u hormartaa. Taasi waxay badeli kartaa xaalada waqtiga oo waxay ku xirantahay waxa muhiimka ka ah wajiga qaar ee nolosha canuga iyo waaya aragnimada isaga/iyada kula xiriirto luuqada gaarka ah. Tusaale ahaan, carruurta labada luuqad waxay lumin karaan xiisaha luuqadooda hooyo markii ay bilaabaan inay ka qeybgalaan Dugsiga barbaarinta af Jarmalka loogu hadlo (kindergarten) iyo saaxibada af Jarmalka ku hadla waxay aad muhiim ugu noqotaa iyaga.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba

**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**

- U dhageyso si taxadar leh canugaaga!
- Marwalba ee canugaaga u dhaho si qalad jumlad ama eray, ku celi arinta xaqiiqda oo qaabka saxan. Haku qasbin canugaaga inuu ku celiyo erayga ama jumlada saxda ah.
- Haka xanaaqin haddii canugaaga uusan markiiba isticmaalin erayga cusub.



- Dulqaad sameey. Kula hadal canugaaga luuqadaada hooyo xittaa haddii isaga/iyada kuugu jawaabo luuqad kale. Markii canuga yahay labo luuqadle, isaga/iyada way diidi karaan inay si firfircoon u isticmaalaan hal luuqad, xittaa muddo waqti dheer.
- Markii canugaaga marayo dhinaca qaab noocaas ah, ha cadaadin isaga/iyada. Sii canugaaga sida fursadaha badan ee suurtogalka ah oo si firfircoon u isticmaalo lanada luuqad. Taasi waa waxyaabaha ugu wanaagsan ee la sameeyo.

Ma ogtahay midaas…

**…u aqrinta dheer iyo hadlida sheekooyinka waa qaabab aad muhiim u ah ee taageeridahadalka canugaaga iyo hormarka luuqada iyo u diyaarintiisa isaga/iyada inay dugsiga bilaabaan?**

# **10.** *Miyaad joogteyn laheyd aqrinta sheekada maanta?*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Cilmi baaris ayaa waxay muujineysaa in ugu aqrinta si dhawaq dheer carruurta ee sannooyinka ugu horeeyo ee noloshooda waxay u leedahay saameyn faa'ido ah ee hadalka carruurta iyo hormarka luuqada.
- Aqrin dhawaqa dheer iyo sheeko sheegida waxay balaarisaa erayada canuga. Waxay sidoo kale abuureen aasaas wanaagsan ee aqrinta iyo qoraalka. Luuqada la qoro way ka duwantahay luuqada lagu hadlo. Markii aad si dhawaq dheer ugu aqrisid canugaaga, isaga/iyada sidoo kale way ku dhageysanayaan oo baranayaan luuqada la qoro.
- Carruurta dhageysataa oo dib u sheegtaa sheekooyinka waxay bartaan waxyaabo badan oo hadhowdii ku caawinayo dugsiga. Tusaale ahaan, waxay bartaan inay dhageystaan, inay diirada saaraan, xasuustaan dhacdooyinka, erayada cusub, naqshadaha jumlada cusub imw.

### Sahlan waxyaabaha maalin walba

**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**



- U aqri buuggaagta sawirka iyo buugaagta sheekooyinka si dhawaq dheer; ku aqri wax yar maalin walba luuqadaada ee aad guriga kula hadashid canugaaga.
- Waxaad ka amaahsan kartaa buuggaagta sawirka iyo buuggaagta sheekada luuqado kala duwan ee maktabadooyin badan in Tyrol. Weydii maktabada halka aad ku nooshahay haddii ay ku hayaan buugaag luuqadaada hooyo.
- Carruurta oo dhan waxay jecelyihiin dhaqanka. Sheekooyinka jiifka waa sida dhaqanka. Carruurta way jecelyihiin inay maqlaan isla sheekada marwalba illaa ay ka fahmaan wax walba guud ahaan oo ay iyaga ku celin karaan sheekada. Ku caawi canugaaga inuu dib u sheego sheekooyinka, tusaale ahaan, weydiinta su'aalaha xiiseynayo.
- Xittaa haddii af Jarmalkaaga uusan wanaagsaneyn, waxaad weli malaha si dhawaq dheer ugu aqrin kartaa buugaagta sawirka af Jarmalka canugaaga.
- Awowga/ayeyda iypo dadka kale ee canuga garanayo oo aaminsanyahay wuxuu sidoo kale noqon karaa dhageyste wanaagsan iyo sheeko sheege.

Ma ogtahay midaas …

**… carruurta waxay si wanaagsan u bartaan markii ay la ciyaarayaan ama la sameynayaan waxyaabo dadka kale iyo ma ahan markii la fadhiyo horida talefishanka ama kumbiyuutarka?**

# **11.** *Telefishanka? Maya, mahadsanid! Waa madadaalo badan la ciyaarida Hooyo/la ciyaarida Aabo … !*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Sidoo kale sida maqalka iyo dhageysiga dhawaqyada carruurta waxay u baahanyihiin inay fahmaan hadalka iyo micnaha waxa lagu dhahay iyaga si markaas u bartaan luuqadaha: waa inay “laacaan” waxa ay arkaan oo ay maqlaan.
- Canuga wuxuu si wanaagsan u bartaa kaliya markii isaga/iyada si toos ah ula xiriiro dadka kale: oo ay la jiraan hooyadiisa/hooyadeed iyo/ama aabihiisa, walaalaha iyo gabdhaha, oo ay la jiraan xubnaha qoyska la balaariyay iyo hadhowdii saaxibo.
- Waxaan ku talinay la daawashada filimaanta qoyska carruurta wanaagsan canugaaga. Daawashada telefishanka saacado ee dhammaadka ama ku ciyaarista geemamka kumbiyuutarka waxyeelo ayay leedahay. Carruurta wax badan kama bartaan iyaga.

## Sahlan waxyaabaha maalin walba



**Waad u sameyn kartaa canugaaga!**

- Canugaaga haka qeybqaato noloshaada. Sii isaga/iyada fursadaha oo si macna ahaan ugu laacayo erayo cusub gacmahiisa/gacmaheeda. Howlo noocaas ah sida u ogolaanshaha in canugaaga kugu caawiyo karinta iyo dubida, biyaha la ciyaaro,ciida iyo dhagaxaanta ama dhoobada si wanaagsan ayay ugu haboontahay si loo taageero hormarka canuga badelkii talefishanka.
- Haddii aad u ogolaato in canugaaga daawado talefishanka, waa inaad go’aansataa waxa isaga ama iyada daawanayaan ama kala hadal barnaamij ama filim isaga/iyada. Qaabkaas, canugaaga si wanaagsan ayuu u fahmayaa waxa uu daawanayo isaga/iyada oo wuxuu sidoo kale baranayaa erayo cusub.
- Waad ka aamahan kartaa geemam badan oo wanaagsan maktabadaha. Waxaad si sahlan u siin kartaa canugaaga waxyaabaha kicinta oo kala duwan uu sameeyo isaga oo aan ku isticmaalin fursad.

Ma ogtahay midaas …

**… carruurta waxay baran karaan inay ku hadlaan af Jarmal wanaagsan haddii ay leeyihiin saaxib ku hadlaa af Jarmal oo da’ xili hore ama ka qeybgal Spielgruppe (kooxda-ciyaarta) ama Kindergarten (dugsiga barbaarinta)?**

# *12. Waxaan sidoo kale rabaa inaan la jiro carruurta kale!*

## Maxay khubaradu ka yiraahdeen?

- Hadal wanaagsan oo af Jarmalka ah waxay muhiim u tahay canugaaga: ee noloshiisa/nolosheeda ee Austria, fayoqabkiisa/fayoqabkeeda ee dugsiga iyo xirfadiisa/xirfadeeda mustaqbalka.
- Si markaas loo barto af Jarmal canugaaga wuxuu u baahanyahay dhiirogelin badan iyo fursado badan oo kala duwan ee la maqlo iyo ku hadlaa luuqada. Saaxibada ku hadlaa af Jarmal wanaagsan waa illaha heerka sare ee dhiirogelinta.
- Ka qeybgalka joogtada ah ee Spielgruppe (kooxda-ciyaarta) ama Kindergarten (dugsiga barbaarinta) kadib dhalashadiisa/dhalashadeeda sadexaad sii canugaaga waqtiga lagu xoojiyo hadalkiisa/hadalkeeda af Jarmalka ka hor u bilaabida dugsiga sida sidoo kale sida diyaarinta caqabadaha hore. Xittaa haddii luuqada aad ugu hadashid guriga aysan aheyn af Jarmal, canugaaga wuxuu weli baran karaa inuu ugu hadlo af Jarmal si wanaagsan haddii isaga/iyada isticmaalaan fursad walba ee loogu dhaqmayo luuqada.

## Sahlan waxyaabaha maalin walba



### Waad u sameyn kartaa canugaaga!

- Taageer canugaaga marwalba isaga/iyada rabo inuu booqdo saaxibo ama ku casuumo iyaga guriga. Carruurta caadi agaab waxay bartaan luuqadaha muhiimka u ah isdhaxgalka maalin walba si dhaqso ah.
- Ka diiwaangeli canugaaga Spielgruppe (kooxda-ciyaarta) ama Dugsiga barbaarinta (kindergarten) sida ugu dhaqsiha badan ee isaga/iyada uu gaaro 30–36 bilood jir ah. Carruurta caadi ahaan waxay baaluqaan si ku filan da'daas oo jacelyihiin inay saaxibo cusub sameystaan oo kula soo biraan geemamka iyo howlaha ee carruurta kale.
- Canugaaga waxaa sidoo kale lagu daryeeli karaa adeega daryeelka canuga markii isaga/iyada uu yaryahay haddii aad shaqeysid ama aad u moodid in canugaaga ka faa'idayo faa'idada waxbarasho ahaan.
- Haddii aad ugu hadashid luuqad kale guriga aan ka aheyn af Jarmal, waxaad isticmaali kartaa geemamka si aad ugu diyaarisid canugaaga inuu ugu hadlo af Jarmalka sida luuqad cusub ee Spielgruppe (kppxda-ciyaarta) ama Dugsiuga barbaarinta (kindergarten). Kala hadal isaga/iyada midaas, waxay ka dhigeysaa isaga/iyada cajiib, waxay bartaa isaga/iyada erayo cusub ee isaga/iada ugu baahanayaan agagaargiisa/agagaarkeeda.
- U sheeg canugaaga waxa wanaagsan ee ay u tahay isaga/iyada si ay ugu suurtogasho inuu ku hadlo dhoor luuqadood.

Fadlan taas qalbigaaga geli markii canugaaga bilaabo dugsiga:

**Durbadiiba waan ilownaa luuqadaha aanan maalgelin waqti walba ama dadaalka. Waa inaan joogteynaa luuqada oo isticmaal haddii aanan rabin inaan ilowno.**

- Durbadiiba waan ilownaa luuqadaha aanan maalgelin waqti walba ama dadaalka. Waa inaan joogteynaa luuqada oo isticmaal haddii aanan rabin inaan ilowno.
- Markii canugaaga aado Dugsiga barbaarinta (kindergarten) iyo hadhowdii dugsiga, Jarmalka wuxuu noqonayaa luuqad muhiim u ah isaga/iyada. Canugaaga wuxuu u baahanayaa taageeradaada iyo dhiirogelinta. Fadlan ha iloobin inaad joogteysid luuqada canugaaga ku soo koray isaga oo ku hadlayo, luuqadaada hooyo ama luuqada aad guriga ugu hadashid.
- The muttersprachliche Unterricht (waxbarashada luuqada hooyo) waa qaab wanaagsan ee canugaaga ugu dhaqmo luuqadiisa/luuqadeeda koowaad. Weydii dugsiga canugaaga oo ka diiwaangeli isaga/iyada fasal noocaas ah.
- Ku dhiirogeli canugaaga inuu aqriyo af Jarmal badan iyo luuqadaha kale.
- Luuqad walba waa wax keyd maaliyeed ah. Qiyamkeeda wuxuu koriyaa inta badan ee aad isticmaashid iyo inta wanaagsan ee aad ku hadashid. Maalmahaan, hadal wanaagsan ee luuqadaha waa go'aanka xirfada qofka iyo doorkiisa/doorkeeda ee bulshada.
- Bilaabida dugsiga waa tallaabo muhiim ah ee dhinacyada madaxbanaan ee canugaaga. Waxaad u baahantahay inaad canugaaga siisid dareenka inaad u dhowdahay iyo inuu marwalba kugu xisaabtami karo inaad halkaas u joogtid.
- Sii xoriyad sida badan ee suurtogalka ah iyo amniga sida badan ee muhiimka ah.
- Ha u sameynin wax canugaaga ee nafsadiisa u sameeyay mar hore. Dulqaadka badi marka uu labisanayo ama labiska iska furayaayo nafsadiisa, xiranayo taygiisa ama xirayo boorsadiisa si uu dabaal ugu aado. Ku dhiirogeli canugaaga inuu madaxbanaanaado!
- Sii canugaaga fursadaha waqti lagu isticmaalayo la ciyaarida carruurta kale ka hor maalintiisa koowaad ee dugsiga. Dugsigaaad ayay muhiim ugu ahaaneysaa isaga inay u suurtogasho inuu joogteeyo sharciyada oo muujiyo tixgelinta dadka kale.
- Haddii canugaaga ku shaqeeyo gacantiisa bidix, haku qasbin inuu isticmaalo midigtiisa! Tani waxay siin kartaa sare u kaca dhibaatooyinka waxbarashada.

## Waxaad sidoo kale ku dhiirogelin kartaa canugaaga adiga oo …

- …siinayo shaqooyin yar iyo howlo
- …ciyaarida, riinjiyeynta, sawirida iyo la sawirida isaga/iyada
- …u suurtogalineyso isaga/iyada inay la xiriiraan qalabyo kala duwan
- …abuurista sheekooyin iyo laxano si wadajir ah
- …kula isticmaalida waqti banaanka isaga/iyada



# Hay'adaha iyo adeegyada ee tallada iyo waaladiinta taageerada ee ku jiro Tyrol

## Familien- und Senioreninfo Tirol (Warbixinta Tyrol ee Qoyska iyo Waayeelka)

Warbixinta Tyrol ee Qoyska iyo Waayeelka waa adeega gobolka faderaalka ee u shaqeeyo sida laanta Waaxda Bulshada iyo Shaqada – Qeybta Kooxaha da'da. Waxay bixisaa dukaan hal joogsi ah oo ay qoysasku ka heli karaan jawaabaha su'aalaha sii kordhaya. Kooxda Waebixinta Qoyska way adagtahay in la marnaba la waayo jawaabta – iyo dhacdooyinka marmarka marka ay yihiin, ay hubaan inay ogaadaan cida bixin karto warbixinta quseyso iyo halka isaga iyada lagala xiriiri karo.

Boznerplatz 5 · 6020 Innsbruck
info@infoeck.at · Taleefon bilaash 0800 800 508

## Caasimada Innsbruck

MA V – Amt für Kinder, Jugend und Generatione (Xafiiska Daryeelka ee Carruurta, Dhalinyarada iyo Qarniyada): masuul ah, ka mid ah waxyaabaha kale, ee xanaanada dugsiyada caasimada iyo daryeelka dugsiga kadib; warbixinta iyo tallada.

Maria-Theresien-Straße 18 · 6020 Innsbruck
Taleefonka: + 43 (0)512/5360 DW 4214 iyo 4218
post.kinder.jugendbetreuung@innsbruck.gv.at
www.innsbruck.at

## Maktabadaha

Waxaad ka heleysaa ciwaanada iyo saacadaha furitaanka ee maktabadaha ee Tyrol ee bogga guriga ee Ururka Maktabada Austrian (Büchereiverband Österreich): www.bvoe.at

## Mutter-Eltern-Beratung (Tallada Hooyooyinka iyo Waaladiinta)

Kooxda Hooyooyinka iyo Tallada Waaladiinta waxay ku faraxsanyihiin inay ku caawiyaan waaladiinta waqti hore sida suurtogalka ah ee ay la jirto dhammaan su'aalaha ka imanaayo uurka, dhalashada iyo la noolaanshaha canuga. Tallada Hooyooyinka iyo Waaladiinta waxaa la heli karaa dhinaca Tyrol, oo siisaa tallo, dhiirogelin, taageero iyo fursadaha isdhaafsiga cilmiga

- su'aalaha ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo daryeelka ilmaha
- qiyaastii naasnuujinta nafaqada da'da ku haboon
- qiyaastii hormarinta dhaqaaqa iyo dhibaatooyinka hurdada
- qiyaastii hormarinta – dhiirogelinta – edbinta su'aalo kale ee walaac ku siiyo!

An-der-Lan-Straße 43 · 6020 Innsbruck
Taleefonka: + 43 (0)512/260135
Saacadaha xafiiska: Isniinta–Jimcaha 8:00–12:00
mutter-eltern-beratung@tirol.gv.at

## Xafiisyada Maamulka Deegaanka/ Hoolka Magaalada

Sidoo kale waad ka heli kartaa warbixin ku saabsan daryeelka canuga, kooxyada-ciyaarta iyo dugsiyada xanaanada ee aagaaga ee ka imaanayo Xafiisyada Maamulka Deegaanka ama Hoolka Magaalada.